



(The Government of Federal Republic of Somalia)

Ref, OPM,0.27/04/18

Date: 05/06/2018

**HESHIISKA LAHAANSHAHA, MAAMULKA IYO WADAAGA DAKHLIGA  
KHEYRAADKA DABIICIGA AH EE DALKA (SHIDAALKA IYO MACDANTA)**

**Hordhac - Mabaadiidda Asaasiga ah**

Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubinta ka ah iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayagoo:

1. **Xaqiijinaayo** in si isu dheeli tiran oo cadaalad ah shacabka loo **gaarsiyo** adeegyada lagama maarmaanka u ah horumarka Dalka.
2. **Garwaaqsan muhiimada** in Dakhliga khayraadka Dabiiciga ah ee dalka ka soo xarooda loogu adeegi doono shacabka Soomaaliyeed iyadoo la tix galinayo baahida qaranka iyo baahiyaha kala duwan ee ka jira gobolada laga soo saarayo khayraadkaas iyo gobolada ma soo saarayaasha ah intaba.
3. **Aaminsan** in **Wadaagida** khayraadka dalka **lagu saleeyo** baahiyaha dalka ee mustaqbalka, kuwa jiilasha soo socda, difaaca dalka iyo midnimada qaranka, tix galin gaar ahaaneedna la siiyo dhibaataada bulsho ama bay'ada ee soo saaridda khayraadku ay keeni karaan.
4. **Tixgelinaaya** baahida weyn ee loo qabo ilaalinta, maareeynta iyo in si caddaalad ah looga faaiideysto kheyraadka shidaalka iyo macdanta.
5. **Aqoonsan** muhiimadda ay leedahay in Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalku iyo kuwa kamid noqon doona ay heshiis ka gaaraan lahaanshaha, maamulka iyo wadaagidda dakhliga shidaalka iyo macdanta.
6. **Tixgelinaaya** baahida loo qabo in ilihii dhaqalaha dalka dib loo soo nooleeyo si ay dowladda ugu suurta-gasho in ay ku fillaato bixinta kharashyada sugidda amniga iyo dib-u-dhiska waddanka oo ay ugu muhiimsan yahiiin dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo kuwa kamid noqon doona.
7. **Garowsaday** baahida loo qabo in si caddaalad ah oo daahfuran loo maamulo dakhliga Shidaalka iyo Macdanta.
8. **Arkay qodobbada** 44aad iyo 54aad ee Dastuurka Ku-meel Gaarka ah oo qeexaaya in Dowlada Federalka iyo Dowladaha xubinta ka ah kawada xaajoodaan awood qaybsiga iyo lahaanshaha, Maamulka iyo wadaagidda dakhliga kheyraadka dhabiiciga ah ee Dalka.
9. **Tixgelinnaya** danta guud ee dalka iyo dadka Ayaan waxaan ku heshiinay qodoboda soo socda:

**Qodobka 1<sup>aad</sup> Lahaanshaha Khayraadka Dabiiciga (Ownership)**

1.1 Kheyraadka macdanta iyo shidaalka ee ku jira dalka, bad iyo bariba, waxaa iska leh shacabka Soomaaliyeed; waxaana wakiil uga ah Dawladda Federaalka iyo dawladdaha xubnaha ka ah iyo kuwa ka mid noqon doona.

**Qodobka 2<sup>aad</sup> Maamulka Khayraadka (Management)**

1.2 Maamulka khayraadka shidaalka iyo macdanta waxaa si wada jir ah u maamulaya Dowlada Federalka iyo dowladdaha xubinta ka mid ah ama kamid noqon doona waxaana la dhisi doonaa hay'addo oo ka shaqayn doona arrimaha shidaalka iyo macdanta oo ay kamid yihiin.

- 1.2.1 **Golaha Khayraadka Dalka:** Golaha Khayraadka Dalka waa golaha ugu sareeya ee lagu lafa guro arrimaha khayraadka ee u baahan in laga heshiiyo, loolana noqdo wixii lagu xallin waayo golyaasha maamul ee kale, wuxuuna ka koobanyahay madaxda fulinta ee heer federal iyo heer dowlad goboleed.
- 1.2.2 **Wasaarada Betroolka iyo Macdanta ee Federaalka:** Diyaarinta Hindise Sharicyeedyada, dejinta siyaasadda, qorshaynta iyo saxiixidda shatiyada ee la xiriira arrimaha macdanta iyo shidaalka ee heer federal waxaa ka masuul ah Wasaaradda Betroolka iyo Macdanta iyadoo wada tashi kala sameynaysa Hay'adaha Shidaalka ee dowlad Goboleedyada.
- 1.2.3 **Wasaaradaha/Hay'adaha Kheyraadka Betroolka & Macdanta ee Dowlad Goboleedyada:** Diyaarinta Hindise Sharciyeedyada, Siyaasadaha iyo Qorsheynta la xiriirta arrimaha Betroolka iyo Macdanta ee heerkooda si waafaqsan Shuruucda iyo Siyaasada guud ee Dalka.
- 1.2.4 **Hay'adda Betroolka Soomaaliya-HBS (Somali Petroleum Authority SPA):** Hay'adda Betroolka Somaaliyeed waa mid loo dhanyahay oo lagu dhisi doono Sharci gooni ah waxayna ka shaqeyn doontaa, Wada hadallada heshiisyada, iyo Diyaarinta shatiyada (Licensing), kormeerka, hubinta iyo hirgalinta Sharciyada Betroolka. Maamulka Hay'ada wuxuu ka koobnaanayaa Labo xubnood oo matalaaya Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo matalaya Dawladaha Xubinta ka ah iyo kuwa ka mid noqon doona. Xubnaha Hay'adda ka midka ah waxa ay noqon doonaan xubno aqoon, xirfad, karti iyo hufnaan lagu soo xulay.
- 1.2.5 **Shirkadda Shidaalka Soomaaliyeed (Somali National Oil Company-SONOC):** Waxaa la asaasi doonaa shirkad ganacsi oo ay wada yeelanayaan Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah ama ka mid noqon doona taas oo yeelanaysa xirrmooyinka (blocks) shidaalka dalka iyadoo kaligood ah ama lawadagaya shirkadaha caalamiga ah mas'uulna ka ah sahaminta (Upper Stream), Dhismaha kaaba yaasha shidaalka, sifeynta (Mid-Stream) iyo suuq geeynta wax soo saarka shidaalka. Maamulka shirkada wuxuu ka koobnaanayaa labo xubnood oo matalaaya Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo matalaya dawladdaha xubinta ka ah iyo kuwa ka mid noqon doona. Rasamaalka iyo wadaaga Saamiyada shirkadda waxaa lagu faahfahin doonaa sharci gaar ah.
- 1.2.6 **Shirkadaha Shidaalka Dowlad Goboleedyada-SSDG (State Oil Companies-SOC)** Sidoo kale Dowlad Goboleedyaddu waxay yeelanayaan shirkado ganacsi oo ka shaqeeya danahooda ganacsi ee arrimaha Shidaalka waxeyna Dowlad Goboleedyada u matalaan saamiga ay ku leeyihiin Shirkada Shidaalka Somaaliyeed, shaqadeeduna waxay noqonaysaa dhisidda iyo maamulidda kaabayaasha shidaalka ee heer dowlad goboleed (Down Stream) iyo suuq geynta cadadka shidaalka ee wadanka gudahiisa lagu isticmaalayo ama isaga oo sifeysan dibada loo iib-gaynayo.

### Qodobka 3<sup>aad</sup> Waddaaga Dakhliga (Revenue Sharing)

- 1.3 Dakhliga ka soo xaroodda macdanta iyo shidaalka waa wadaag (sharing) waxaana si isu dheeli tiran loogu qaybinayaa Dowlada Federalka iyo Dowladaha xubinta ka ah ama ka noqon doona.

### Qodobka 4<sup>aad</sup> Maamulka Maaliyadeed ee Dhakhliga Shidaalka iyo Macdanta

- 1.4 Keydinta iyo maamulida dakhliga kaso xarooda kheyraadka shidaalka iyo macdanta waxa lagu keeydin donaa Xisaab (Account) gaar ah oo laga furi doono bangiga dhexe ee Soomaaliya. Waxaa xisaabta lacag looga saari kara go'aanka golaha kheyraadka dalka iyadoo la raacayo hanaanka maamulka maaliyadeed ee Dalka

**Saxiixa Heshiiska**

Dawladda Federaalka Soomaaliya:

Mudane Xasan Cali Khayre


Ra'isal Wasaaraha JFS



Madaxda Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ah iyo Gobolka  
Benaadir


Mudane Cabdiwali Maxamed Cali Gaas

Madaxwaynaha Puntland



Mudane Axmed Maxamed Islaam

Madaxwaynaha Jubbaland



Mudane Sharif Xasan Sheekh Adan

Madaxwaynaha Koonfur Galbeed



Mudane Axmed Ducaale Geelle

Madaxwaynaha Galmudug




Mudane Maxamed Cabdi Waare

Madaxwaynaha Hirshabeelle



Mudane Cabdiraxmaan Cumar Cusmaan

Guddoomiyaha Gobolka Benaadir



Taariikh 05 June 2018.

**Qodobka 6<sup>aad</sup> Lifaag**

**1. Shaxda Wadaaga Dakhliga Shidaalka**

Faahfaahin	DFS	DXF (Soo-saaraha)	Degmada soo-saaraha)	DXF (ma soo-saarayaasha)	Faalo
Investment Fund					Wasaaradaha Maliyada ee FGC/FMS aya go'an ka gaaraya
Offshore	55%	25%	10%	10%	
Onshore	30%	30%	20%	20%	
Royalty	40%	40%	10%	10%	
Signing Bonus	40%	60%			
Surface Rent	30%	50%	20%		
License fee	50%	50%			
Production Bonus	30%	50%	10%	10%	
Corporate Income Tax	100%				
Export Tax	60%	40%			
Capital gains	50%	30%	20%		
Seismic Data	50%	50%			
Capacity Building	50%	50%			
Local Community development	%	30%	70%		

**2. Shaxda Wadaaga Dakhliga Macdanta**

MACDAMAYSIGA					
Faahfaahin	DFS	DXF (Soo-saaraha)	Degmada soo-saaraha)	DXF (ma soo-saarayaasha)	Faalo
Investment Fund					Wasaaradaha Maliyada ee FGC/FMS aya go'an ka gaaraya
Corporate income tax	100%				
Capital gains tax	65%	35%			
Mineral royalty	30%	40%	30%		
Surface rental	20%	50%	30%		
Licensing fees	50%	25%	25%		
Community development	10%	30%	60%		
Training	50%	50%			
Net profit	50%	50%			

*(Handwritten signatures and initials in blue ink)*